# Golaha Wakiilada JSL.

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 36aad fadhigii 2aad**

**29/04/2018**

**Quraanka: -**Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Md.  Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga: -** Warbixinta Xukuumada ee Heshiiska Dekada Berbera

**Gudoomiyaha:-** Mudanayaal shalay waxan u yeedhnay gudidiii la soo saxeexatay heshiiska dubai, waxa jooga wasiirka arimaha dibada sacad cali shire,waxa kale oo jooga wasiirka maal gashiga mudane cawaale ibraahim shirwac,wasirka maal gashiga iyo hurumarinta maxamed axmed maxamuud,iyo mareeyaha guud ee dakada ,waxanu ugu yeedhnay inay warbixin ka bixiyaan heshiiskii dekada berbera, markaa warbixinta ay samaynayaan suaalana wad waydiin kartaan, markaa xildhibaan waliba waxa uu waydiibnayaa labo su,aalood, wax ka badan ma waydiin karo,wax arar la yidhaahdaana ma jiraana xildhibaan waliba toos ayuu suaasha ugalayaa,waxan ku soo dhawaynayaa, wasiirka wasaarada arimaha dibada sacad cali shire si uu warbixintii u bilaabo.

**Dr. Sacad Cali Shire Wasiirka Arrimaha Dibada:-** Shirgudoonka xildhibaanada wasiirada bahda saxaafada mudanayaal iyo marwooyin waan idin salaamayaa, salama calaykum wa raxma tulaahi wa barakaatu, sharafbay ii tahay inaan manta halkan idin hor imaado, oo idiinka waramo socdaal dhawaan aan ku tagnay wadanka imaaraatka aniga iyo waftiga halkan ila fadhiya, waxan doonayaa halkan inaan warbixintayda ka dhigo suaalo iyo jawaabo.

**Su'aasha u horaysaa waxa weeyi waxa dhawaan aad ku tagteen socdaal wadanka imaaraatka idinka oo waftiya imisaa ahaydeen?**

Waftigu waxa uu ka koobnaa todoba qof oo kala ah 4 wasiir oo ka koobnaa wasiirka arimaha dibada, wasiirkamaaliyada, wasiirkaqorshaynta, wasiirka maalgashiga, waxaana weheliyay maareeyaha dakeda mareeyaha free zone ka iyo ifraax oo ka socota madaxtooyada. Waxa kale oo na waheliyay 3 loyar oo shirkada la yidhaahdo seemons and seamons oo arinkaa mudo badan inagala shaqaynaysay ka socday.

**2. Ayaad la kulanteen intii aad halkaa joogteen?**

Waxa aan la kulanay labo wafti, wafti ka socda Ethiopia oo uu hogaaminaayo wasiirka gadiidka iyo wasiiru dawlaha maaliyadu, iyo wafti kale oo ka socda shirkada dp world, oo ka koobnaa madax iyo looyaro.

**3 kulankaasi halkee buu ka dhacay?**

Kulankaasi waxa uu ka dhacay magaalada dubai.

**4 muxuu ahaa u jeedada kulanku? Waa maxay u jeedada aanu ka lahayn?**

Ujeddada kulanku waxa uu ahaa inaanu ka hadalno kala sexeexanana labao heshiis

**5 maxay kala ahaayeen labada heshiis?**

Waxay kala ahaayeen heshiis sedex geesooda oo ku saabsan wada lahaanshaha shirkada dekada DP WORLD BERBERA la yidhaahdo, oo ay ku bahoobeen Somaliland Ethiopia iyo shirkada DP world. Kala baadna waxa uu ahaa isagu heshiis labo geesooda aaga xorta ah ama free zone ka oo ay kala sexeexdeen dawlada Somaliland iyo shirkada DP world. Waa labadaa heshiis weeyi, hadaan wax yar ka taabtaabto heshiiska hore ee sedex geesoodka ah oo aan is waydiino suaasha ah side baa loo kala lee yahay saamiga shirkada Somaliland Ethiopia iyo DP world inaga dhaxaysa waxa loo kala lee yahay saamiga shirkaas sidan

Somalilnad 30%, Ethiopia 19 %, DP world 51%.

Hadii aynu markii hore nu ahayn DP World iyo Somaliland maxay nu uga baahnaahay Ethiopia?

ehiopia waxa nu uga baaha nahay labo shay, midi waxa weeyi maal gashi, midna waxa weeyi macmiil weeyi, xaga maal gashiga, waxa ay ethiopia maal gashanaysaa saamiga wixii kaga soo hagaaga maalgashigii guud eek u baxaayay fidinta iyo balaadhinta dekada oo ahaa, 442million oo dollar, taaa macna heegu waxa weeyi, waxa ay maalgashanayaan qadar gaadhaaya qiyaastii 80 million oo dollar, maxaynu uga baahnahay macmiil keda? Waxa nu uga baahnahay wakhtigan xaadirka ah inaga iyo ethiopia ganacsi baa inaga dhexeeyo, gancsigaasi dhinac kaliya ayuu ka socdaa sida badan, wax badan bay nu ka soo iib Sanaa, oo xoolaha iyo qaadka iyo sibidhka iyo khudrada intaaba isagu jirta, inaga wax yar baa inaga taga, markaa adeeg bay nu waydaarsanaynaa badeecadahaa inooga yimaada ethiopia, markaa ganacsiga inagga inaga dhexeeya ayaa u baahan inaan adeeg ka iibno.

Ethiopia miyay dekada inala maamulaysaa? Maya dekada waxa maamulayaa shirkada DP world, ee saami uun bay ku lee yihiin shirkada Ethiopia, boardkana xubnay ku leeyihiin lakiin maamul inala maamuli mayso.

Sidee buu u samaynayaa badeecada inaga la ina soo mariyo amba ku socota ama ka timaado ethiopia xidhiidhka wada shaqayneed ee imika ay lee yihiin Djibouti iyo Somaliland, miyuu Djibouti saamaynayaa? Mayee samayn mayo, horta dhismahaa iyo baalaadhintaa dekadu lafteedu waxa uu qaadanayaa wakhti ilaa 24 bilood bay qaadanaysaa ama labo sano.

Dhinaca kale dhaqaalaha iyo dadka ethiopiaba waxa ay ku korayaan xawli aad iyo aad u sareeya, daraasa yar oo nu samaynay 25sano ee soo socda , bal populationka ethiopia iyo labada dal ee kale ee aan la hayn bada , ee Uganda and south Sudan, waxa uu noqon doono , manta ethiopiaa population keedu ilaa 100million weeyi in yar buu kor u dhaafay , lakiin 25 sano kadib sedexdaa wadan marka la isku daro population koodu waxa uu gaadhi doonaa 322 million, dhaqaala hooguna guud ahaan waxa uu noqon doonaa ilaa 640 billion, labadaa qodob oo kaliya hadaad eegto, dekadaha ay baahnaan doonaan way ka badnaan donaan ta Djibouti iyo Berbera ba, ta casaba iyo inta kale ee imika jirtaba , waxa ay baahnaan doonan ilaa 10 dekadood, dekadeenu traficga soo maraya ee ethiopia ka imanayo ama ku socda waxba ka ridi mayo, dekada jaarka nu nahay ee Djibouti,

**Waa maxay sharciyada heshiisku? Ama sharciyadee buu ku salaysan yahay?**

Heshiisku waa sharci, waxa uu ku salaysan yahay heshiiska halkan uu baarlamanku ku ansixyay Somaliland, waxa uu ku salaysan yahy distoor keena, oo u ogolaanaayo madax waynaha, iyo xukuumadiisu la galaan heshiis , cid sedexaad ama dal ha ahaato ama shirkad ahaato, heshiiskani kii noogu hreeyay maaha, heshiisyo badan bay nu la galnay dalal, heshiisyo badan bay nu la galnay shirkado, wadamada aan heshiis yada la galnay waxa ka mida, Djibouti, ingiriiska,Holland,sayshalis baa ka mida, way fara badan yihiin .sshirkada badan oo inala joogana heshiis bay nu la galnay, waxaynu heshiis la galnay laftigeeda dawlada federalka ah ee Somalia, oo laga soo bilaa 2012 waa nagii dhawrka jeer is aragnay, ee iskugu nimid shirar marar badan, heshiibay nu kla sexeexanay baaq baan nu soo wada sarnay, iyada lafteedu waa ka mid markaa wax cusub maaha. Inaan dawlad kale ama shirkad kale aynu la galno heshiis, sharciga caalamkuna ma diidayo, sharciga federalka somaliya inaga inamaqabto, dadkeenu farmaajo may doonan, dadkeenu xildhibaanada xamar fadhiya may dooran, ma mataal iyagu, dantoodana kama talin karaan, dadkeenu waxay doorteen xildhibaanda halkan soo fadhiya, waxay doorteen madaxwaynaheena madxwayne kuxigeen keena.

**Heshiiskeenu miyuu wax dhibaata ah u leeyahy dalka soomaaliya?**

Mayee uma laha ee faaido ayuu u lee yahay oo waxa dakada soo maraa waxa ay waraabin karaan wadamada aynu jaarka nahay oo dhan, ama ha ahaato Djibouti ama Ethiopia ama somaliya.

**Miyay dawlada soomaaliya xaq u lee dahay inaan is hortaagto heshiiskeena?**

Maya ee xaq uma laha, waxay ka soo horjeedaa diid madaasi jaar nimadeena, nabd ku wada noolaasha heena, xuquuqda bili aadanku ee ah inuu horu maro ayay runtii ka soo horjeeda,

**Miyuu is hortaaga ay is hortaageen heshiiskan iyo horumarkeena wax yeelayaa iyo wada hadal keena?**

Haa oo uu yeelayaa, oo hadii jawi lagu wada hadlaa ayna jirin ,dabcan marka la isma soo hor fadhiisan karo , inagu kamaynaan bixin wada hadal kii wada hadal kii wa halkiisii weeyi , lakiin waa in jawigii saxdii la helo, si loo wada hadlo.

Maxay inaga inala haboon oo inal gudboonhadii aynu nahay dadka reer Somaliland marka arinkaa timaado qadiyadaas? Waxa inala haboooon inaynu gidi gacmaha is qabsano, miodawno si kali ahaano, haday tahay dawlada haday tahay baarlamanka, hadady tahay shicibka, qurbajooga iyo madal joogab intaba rag iyo haweenba, dhalin yar iyo waayeelba. Intaa waxan ku dhamaynayaa warbixinta ku saabsan heshiiskii sedex geesoodka ahaa ee nu wada galnay, inaga iyo Ethiopia iyo DP world.

Waxan u gud bayaa heshiiska labaad ee free zone ka , heshiiskaasi waa heshiis laba geesooda sidanba sheegay , waxa uu ka dhexeeya inaga iyo DP world, free zone ku baaxadiisu intee bay leeg tahay , baaxadiisu waa ilaa 1240higtar weeyi, xaguu ku yaala ? Wuxuu u dhaw yahay magaalada Berbera ilaa labo kilo meter ayuu u jiraa wada isku xidha Berbera iyo hargaysa.

Goormuu bilaab mayaa dhismaha free zone ku? Insha allaah sand kan gudihiisa ayuu bilaab mayaa. Waa maxay faaida inoogu jirtaa inaga ama dadka reer Somaliland free zone ka? Runtii faaido baaladhan baa inoogu jirta free zone ka sida caadiga ah labo shay baa loo samaystaa, mid waxa weeyi shaqo abuur, midna waxa weeyi wixii ka soo baxa in dibada loo dhoofiyo, oo lacag adag laga helo waxan rajaynaynaa, labadaba inuu naga saacidi doona insha allaah , ugu danbayn waxa doonayaa inaan wax yar ka idhaahdo isaga laftigiisa, shirkada maal gashiga ah ee Somaliland oo wax badan suaalo la iska waydiiyo laftigeega, ayan jecelahay inaan halkan wax ka iftiimiyo, shirkad maalgashiga Somaliland maxay tahay yase leh?Shirkada waxa iska leh dawlada somalilnad. Yaa ka masuula oo uga masuula Somaliland? Waxa uga masuula Somaliland oo maamul keeda iska leh wasarada maaliyada. Shirkadaasi halkee bay ka diiwan gashan tahay? Shirkadu waxa ay ka diwan gashan tahay magaalada Dubai, xarunta la yidhaahdo financial dabai international center **(DFIC**). Goormaa la sameeyay oo ay soo baxday? Waxa ay soo baxday bishii hore ee February dhexdeedii ayay ahayd. Waa maxay u jeedada loo sameeyay? Maxay faaido inoo lee dahay inaga? Waxa ay shirkadu inoo fududaynaysaa in la ina maal gashado, taaweeyi runtii sababta ugu wayni, madaama aan wali ictiraaf buuxa aynan haysan, horta ictiraaf waynu haysanaa had iyo jeer waxay yidhahdaan ictiraaf ma haysano taasi sax maaha, ictiraaf waynu haysanaa walise waa inoo dhamaystirnayn, cid iska indha sabaysaa ma jirto,inay Somaliland buuxisay wadan madax banan oo dhan , oo ay lee dahay barlaman iyo madx wayne la soo doortay, oo ay soo doorteen dadka shicib ki ihi, inaynu calan lee nahay, ciidan lee nahay, jirno wadankeena ka talino. Lakiin madaama aynaan wali haysanin, ictiraafkii dhamaystirnaa, waxay inoo fududaynaysaa sidii aynu ku heli lahayn maal gashi dibada ah, faaidada ugu horaysaa waxa weeyi inay inaga caawiso dekada manta jirta, hadii ay shirkadu halkaa

ka samaysan tahay, oo ayna wadanka ka samaysnayn, yaa xaqiijinaaya inayna wax maamul xumihi aanan ku imanin. Shirkadu waxa ay lee dahay, board bay lee dahay wasaarada maaliyada ayaa u xil saran daba gal keeda, maaliya deeda ,xisaabaad keeda, waxa kale oo ay leedahay audit international ah ayay lee dahay.

Maxay ku kala duwan yihiin shaqada ay shirkadu qabato, iyo shaqada wasarada maal gashiga loo idmaday? Waxa weeyi iska hor iman maayaane way Is kaabayaan, shaqada wasaaradu waxa weeyi in ay soo jiido maalgashadayaal, oo halkan marka ay yimaadan u fududayso hawlaha halkan ay uga baahan yihiin si ay isku diiwan galiyaan oo ay wadanka uga shaqayn lahayeen, xilka shirkada xagaasina waxa weeyi, sidii ay ugu fududayn lahayd markay goaansadaan inay halkan yimadaan si aan heshiis ula galno, ama halkan ay maalkooda u soo galiyaan.

Maxaa khasaare inoogu jira shirkadaas? Wax khasare ah oo inoogu jiraan ma jiraan, oo aan ahayn oo aan ahayn kirada xafiiska oo ka mida shuruudaha runtii la inaga rabo, madaama aad moodo in dadku runtii fahan la, aan ka muujiyeen. Maxaa talo inooga ah, inaga wax talo inoog ah oo aan runtii ka aaminsanahay, oo aan ku wada qanacnay intayada xagan fadhidaa, inay ay tahay shirkad aad iyo aad inoogu muhiima, oo aynu u baahanahay hase yaashee in dib u eegis lagu samayn karaa insha Allah. Markaa warbixintii halkaa baan ku dhameeyay ku saabsanayd, sedexda qaybood ee ahyd heshiiskii shirkada aan ku wada lahayn sedexda geesood, iyo free zone kii iyo shirkada maalgashiga Somaliland. Aad baad u mahadsan tihiin.

## Su'aalaha Mudanayaashu Wasiirka Waydiiyeen.

**Md. Xaashi Xuseen Caabi: -**

1. Wasiirayaal aad baad u mahad san tihiin inaad golaha timaadaan oo aad naga siisaan warbixin DP world free zone ka iyo maalgashiga, wasiirayaal manala aragtaan horta in ay DP world tahay fidmo, dalkan Somaliland lagu soo tuuray, ama lagu soo ganay, oo waxa faaida ah oo ilaa manta daana laga helay, ama laga hayaa anay jirin, dhibaato danbe oo iyada iyo base ku oo an mar danbe ka sheekayn doono sidaa ma noola aragtaan?
2. waxa weeyi maalgashigu 80 million ee lagu qiimeeyay 19% la siiyay ethiopia, 80million ma Somaliland baa leh, mise waxa leh DP world,xagay galayaan? Qodobka kale waxa weeyi, 19% ma in dawlada somalilnad bixiso oo ay ku illaaliso?

### Jawaabta Wasiirka:-

1. Bismilah xildhibaanku su'aalo wanagsan buu I waydiiyay ,insha alaah waxan isku dayi doonaa inaan ka jawaabo suaasha ugu horayso ee ah DP world Ma fidno iyo dhibaatay inoola timid , oo sidaa ma noola aragtaan, mise wax tar bay inoola timid , anagu runtii wadanka kumaan soo hagneen , cid dhibaato iyo fidmo inoola timid ama inoola imanaysaa anagu runtii waxaan u aragnaa inay tahay , shirkad aynu u baahan nahay,

waayo dekadeenu waxa ay u baahan tahay maal gashi , barigii hore badeecadu waxa ay ku iman jirtay jawaano iyo saxarado taa waa laga guuray, imika se waxa loo wareegay containers, dekadeenu na uma habaysna container trminal, waxa nu u baha nahay container terminal inaynu ka dhigno, sidii looga dhigi lahaa waxa ay u bahan tahay lacag faraban oo aan inagu haysanin, madaama oo aan inagu wax soo dayn san karayn, markaa shirkadan ayaa shirkado badan ayaa inoo yimid, ilaa 6 shirkadood ayay ahaayeen, waynu kala saarnay , markaa shirkadan ayaa noqotay shirkadii ugu balanta wanaagsanayd ayay ahayd, sidaasaynu ku galnay , wax badana waynu ka rajaynaynaa . Baalaadhinta dekada insha allaah sanadkan bay bilaab maysaa, waa la dhameeyay design kii, desing base ba ka horeeya waana la dhameeyay, dhagaxuna waxa la dhigi doonaa oo ay bilaabmi doontaa, markaa waxan rajaynaya in khayr badan inoo keento, oo ay dekada inoo balaadhiso, oo ay badeecad badani inoo marto Ayaan rajaynayn naa.

2. Ta 80 million waxa lagu maal galinayaa DP world iska qadan mayso oo jeeb keeda galin mayso, waxani way xisaab san yihiin, waxa looga bahan yahay baaladhida dekada, oo ah sedex waji, wajiga koobaad maamul toosin iyo habayn, wajiga labaad oo ah 400mitir oo ah dekada, iyo wajiga u danbeeyo oo ah 400mitir. Markaa lacagtani waxa ay galaysaa dhismaha dekada ayay galaysaa, xaga saamigu waxba is badali mayo, oo sidaas uun buu ahaan loo kale yeelanayaa, 51%, 19%, 30%. Hadii ay shirkadu macaashto iyo hadaanayn macaashinba, wax samayna ma ku yeelanayso saamiga sida loo kala lee yahay.

**Md. Maxamed Jamac Cilmi (Dable):-**

1. Wasiirada iyo martisharafta kalaaba waad salaman tihiin, shirgudoonka iyo xildhibaanaduba waa salaaman yihiin, wasiir waxa ku waydiinayay wax walba waxa u aas aasa distoorka Somaliland wixii ku jira ayuun baa sharciya, sunaha nabiga hadii uu kitaabka illahay ka baxo maaha xadiis, markaa arimaha halkan aad ku soo qaadeen waxa u base distoorka, heshiiska intii aad ka hadlaysay waa ma waaqiic ku jirta heshiiskii. heshiiskii sida distoorku qorayo sida Qodabk 53, maxaa loo keeni waayay isagaana u ah saldhig, si waxan aad ka hadlaysaan oo ah in laga hela ah, imika waxan aad sheegaysaan waa hadal, lakiin distoorku waxa uu lee yahay heshiiska waa in la keenaa oo goluhu u codeeyaa, marka labada dawladood ay heshiiyaan, mee day lifaaq yadii iyo heshiis yadii waxa aad ka hadlaysaa ku jireen? Takalle qodobada aad halkan ka sheegteen waxa weeyaan, 128 qodobka distoorka ayuu ka soo horjeedaa waa baadil, waxa halkan ku qoran in aynu la heshiinay dekado kale in la sameeyo, distoor keenuna waxa uu lee yahay waa suuq xor ah weeyaan, sababta loogu xidhayiyadoo distoorka qodobkiisu uu jiro, ee qodobkaa loo jabiyayna waan waydiinayaa?

2. waxa jira in laba sanadood nidhi laba daa sanadood lacagtii ka soo baxday dakada, maxaa inagaga soo noqday inaga warka waxa nu ku haynaa 2.5 milyan ayaa ka soo baxa dakada Berbera bishii, 2sano Bishan march buu ku eg yahay, markaa faadidadii wadanka lacagtii

soo galaysay 200000 bay nu ka helnaa bishii, iyaguna 2.5million ayay ka helaan bishii, faraqaa maxay nu dhaafsiisanay? Lakiin waxan ku adkaysanayaa in la keenoo qodoba daa u wasiirku ka hadlay, waa in la keenaa dabadeedna goluhu u codeeyaa.

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Xildhibaanku suaalo fiican buu I waydiiyay, horta wixii uu distoorku dhigaayo, ayuun bay nu raacaynaa, inaga distoorka ayaa ina xukuma ka hor iman mayno, hadii la keenaayo, hadii aan la keenaynba wixi sharcigu yidhaahdo ayuun bay horta raacaynaa, heshiis yada imika aynu soo galnay anagu waxay ku salaysan yihiin heshiiskii qodabadiisa doorka ah xagan la keenay, ee laga baas kareeyay ayay ku salaysan yihiin. waxa kale oo uu ku salaysan yahay, in aynu u madax banan nahay, cidii aan doonana heshiis la gali karno ayuu distoorku odhanaya Qodobkii 90, wuxuu siinayaa madaxwaynaha in uu dawlad iyo shirkadba cidii isagu u arko dan in uu heshiis lagali karo, markaa waxa uu ku salaysan yahay distoorkeena, sida uu distoorku inaga dalbaayo halkan markaa sidaa uun bay noqonaysaa, waayo waa arin sharci weeyi,arinka ku sab san heshiiska wuxuu inoo diidayaa dekado kale inoo diidi mayo,dakado kalena way inu samaysan karnaa. Waxa ku qoran container port kale ee dakdoo dhan maaha, waa mid gaara, maadaama ay lacag badan gashanayso shirkadu, waxa ay bahan tahay in ay maal gashigeega ilaashato, hadii aynu u baahano oo ay dekad kale soo baxdo imika sida prt terminal oo kale waynu samaysanaynaa cidina inoo diidi mayso, hadii ay samayn waydana cid kale ayaa inoo samayni, dekada heenoo dhana waynu hor marsanaynaa, oo waynu samaysan karnaa.

**2.** Arinka kale ee maxaa ka soo baxay iyo maxaa inaga inaga soo galayba, horta imika sanad uun baa laga jogaa, march markay dhamaato sanad baa dhamaanaaya, sharcigu wuxuu odhanayaa sanadkun markuu dhamaado waa in xisaab xidh la keeno, markaasay cadaan doontaa auditna shirkadu way lee dahay, inaguna xaq bay nu u leenahay in ay auditorska kale oo madax banan inaynu u qabsano. Wixii xisaabee ka soo baxa, bay markaasay nu arki doonaa, hadii an helnay iyo hadii aanu helinba. Waad mahad san tahay.

**Md. Cabdilaahi Xuseen Cige (Blacky):-**

1. Shirkadaa sida aynu ka war qabno ama procedure ka shirkadaha loo sharciyeeyaa uu yahay, shirkad waxa keh cidii diwan gashata marka la diiwan galinaayo, shirkadaana sida ka muuqata dad shaqsiyaada baa ku qoranoo oo aad adigu ka mid tahay, oo share ka iyo nidaam kaba leh , maxaa umada iyo golaha ba ku qancinaysaa, shirkadasi inay tahay mid reer Somaliland lee yihiin , madaama nidaamka shuruuceedee ee shirkadaha loo diwan galiyaa ama ayna dawladi ku qornayn, ee shaqsiyaad ku qoran yihiin,maxaa umada iyo gohaba ku qancinaysaa in shirkadasi tahay mid reer somalilandna? Ta labad waxad sheegtay in wasaarada maaliyadu masuul ka tahy inagoo leh wasaarad maal

gashi, sidaad adiguba sheegtay madaama ay wasaaradii maal gashigu joogto maxaa iyadana wasaarada maaliyada u geeyay?

2. Constitution ka Somaliland ee aynu lee nahay, wuxuu qorayaa midnimada iyo qaranimada Somaliland waa muqadis,kan kale ee dawlada soomaliya ee heshiiska nu la galnay ee marar badan la shirnay mudaba 9jeer wuxuu lee yahay, midnimada soomaaliya waa muqadis, hadii aynu u dhaaranay oo qaran keena ,iyo madax deenu u dhaarteen, distuur keenu inuu siduu yahay loo qaato oo ay lama taabtaan tahay, soomaliyana wax kaste oo aynu la galnay, mar walba ta ka baxdaa ay iyada tahay, maxaa ina dalinaaya oo nu udhaaranay qarankee oo nu soomaaliya la hadalno, waxay u dhaarteen bay lee yihiin, inay midnimadu muqadis tahay, maynaan ku daalayn uun,maxaa dhinac kale uga wareegi waynay, heshiis kastoo la gashaana iyagaa ka baxa, sida marar badan dhacday maxaa inagu daalinaaya ?

### Jawaabta Wasiirka:-

1. Hadaan ku bilaabo suasha kobad ee xildhibaanku I waydiiyay, shirkadaha marka la diiwan galinaayo inta badan waxa ay lee yihiin shuruudo caalamiya bay le yihiin,oo caama shirkada markaa diwan galinayso waa inay magac yeelato, waa inay adres yeelato, waa inay board yeelato, waa inay shares yeelato, waa imay xog hayn yeelato, waa shuurudaha ay lee dahay. Waa kala jad boardka iyo la haanshaha saamigu, dadka lihi waa kala jaad, dadka boardka lihi maaha necessary in ay samiga yeeshaan sahqo iskuma laha. Shirkadan sharcigeegu wuxu odhanayaa, boardka waa run anigaa ku qoran iyo safiirkeena imaratka ayaa ku qoran xaga boardka, oo shuruudaas cayn kaasa in magacyo la keeno, lakiin saamigeega iyo share keeda waxa iska leh somaliland, waxaanu uga masuula dawlada Somaliland, shirkad walba sharci ayay lee dahay article memorandum shirkadaha kale plan way lee dahay, xitaa hadaad guugal garyso waxa laga yaaba inaad ka heshaba. Shirkada anagu ma lihin, waxba kuma lihin, shirkada somalilnad baa iska leh, in magacaygu ku yaalo boardka ama kagu ku yaala waa isku mid, cidna shaqo akle kuma laha, shuurudaha uunbay nu buuxinay. Haii aan leenahy wasaarada maalgashiga maxaa u geeyay wasarada maaliyada, wasaaradu maaliyada waxa u geeyay xisaabaad bay nu ka hadlaynaa, wixii xisaabaadana iyadaa inoo qaabil san, is diidina mayaan wasaarada maal gashiga iyo shirkaduba shaqadoodu way is kabayaan, way isku bahan yihiin.

2. Arinka ku saabsan wada hadalka iyo hadii inag madax bananideenu muqadas inoo tahay, iyaguna ay lee yihiin soomaaliwayn baa muqadasa, maxay nu kala hadlaynaa. Horta laba kasta oo wax isku qabataaba, caqligu waxa uu ku siinayaa inay wada hadlaan, intaana la isku dhicin hadii la wada hadli waayo markaa waa la isku dhacayaa, waxa nu doonayna hadaan hadal ku haeli wayno, inaanu dagaal ku helno, lakiin hadaan nu argon

inaana waxba ka soo naasacadayn, dhinac kalena hadii uuna raaliba ka ahayn, ama aynaba ka gonayn, wax inagu kalifayaa ma jiraan, markaa wixii kale ee nu dan moodno ayuu nu qabanayn naa insha laahu.

**Md. Dr. Mohamed Ahmed Carabayte:-**

Shirgudoonka, Wasiirada iyo Goluhuba waa ay salaamayihiin, waxa aad moodaa suaalihii hore marka jawaabtii aad ku qanci waydo inad soo celisaa waa muhiim,

1. Xaga heshiiskii lala galay DP world ee xildhibaankii iga horeeyay ka hadlay, halkan markii hore MOU aya la keenay memeoradam of understabding buu ahaa ma ahayn heshiis lala galay DP world. Markaa waxan ku celinayaa sacadatu wasiir, in loo bahan yahay heshiiski dhabtii oo loo arko oo loogu qanco, waraaq yar oo afsoomaali lagu soo turjumay ayaa halkan la keenay, waynu isla wada ognahay wixii halkan la keenay. Shirkadan maalgashiga wasiirku wuxu yidhi dadku way fahmi waayeen, garan mayo inay xasuusan yihiin mooyaane, markii London la iskugu tagay marba la sameeyay shirkad maalgashi oo London laga sameeyay in wasiirku ku jiray mooyaane, wasiir muu ahayn shirkada hore ee maalgashiga inta la sameeyay dhib baa ku dhacay Somaliland lama arag meel ay ku danbaysay lama arag, sidaa baa looga shikisan yahay shirkadan oo kale hora loo sameeyay, maxay kaga duwan tahay tii horee la inagu dhacay?

## Jawaabta Wasiirka:-

1. Arinka ku saabsan keenista heshiiska golaha baarlamanka, hore waan uga hadloo waxan idhi arinkasi waa arin sharci, hadii dastuurkeena iyo sharcigeenu sidaa sheegayaan anigu ma odhanaayo yaa la keeni hala kenan leehay, waa arin idinka idiin yaala looyarada iyo shuruucda waxba Kama qabo anigu. Maxay ku kala duwan yihiin shirkadan iyo shirkadii hore ee dadka lagu dhacay, anigu shirkadaa dadka lagu dhacay war kama hayo,lakiin tan mid dad lagu dhacaayo maaha, waa shirkad dawladu iyadu lee dahay wax akle ma qabatee wax uun bay fududaysaa oo dadka doonaya inay mal gashadaan, mid dadkeena lagu dhacaayo maaha, waa mid shirkado kale aan ku soo jiidanayno, siaay wadanka inoogu yimadaan sidaa darted aan sheegayna hadii dadka waxa moodaa inuu fahan kiisu qaloocday,anigu waxan qabaa inay faaido inoogu jirto Ayaan aad iyo aad u qabaa oo ugu qanacsanahay, lakiin hadii la mad madoobeeyo dib baa loo eegi karaa, wax aan inagu ku wayno mooyaane wax inooga kordhayaan ma jiraan. Markaa kaasi waxa uu u yaala runtii madaxwaynaha in dib loo eego, laakin waa wax faaido inoo leh runtii xadhko badan oo inagu xidhan oo aan aqoomsi buura ah la hayn inaga fur furi lahayd.

**Md. Axemd Ducaalae Bulaale:-**

1. Su'aashayda hore waxa weeyi waa shares-ka, shares-ka aad sheegtay memoradumka aan ansixinayna wuxuu ahaa heshiis labo dhinaca, waxa kale oo ku tiilay 5sano inaanan la bixin wa sharesa aan la bixin Karin, halkaa waxa doonayaa suashu waxay tahay, markii

heshiiskaa ethiopia soo gashay dadka confuse badan baa ku dhacay waxa la share gareeyay in siifacan logu sharaxo, maxa la share gareeyay madakada aan lahayn baa la share gareeyay, ma macaash baa la share gareeyay, halka dadku waxa ay u baahna yihiin in sharax badan laga siiyo bal waxa sedexda dhinac ay share gareeyeen,anigu ma diidani in sedexda dhinac waxa share gareeyaan ethiopiana muhiimadeeda waan arkaa, lakiin dadka waa in loo sharaxa sedexda dhinac maxay share gareeyeen oo warar koodu yahya ma dakadii barbera ayaa la qaatay?.

2. Suaasha labaad waxa weeyi warka yaala waxaweeyi lacagta soo baxdaa ee shirkada DP world qaado marka hore Somaliland shiling bay ku qabataa, marka danbena suuqyaday gashaa oo dollar bay ku badalataa farabadan, dolalrkana waxay u dirtaa wadankeeda oo accounaday ku shubataa, taasina dhibaatooyinka dollarka kordhiyay ayay ku jirtaa taana waa iga su'aal?

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Arinka ku saabsan 5sano iyo in la bixin wax share ah, horta waxa jira meesha consaction iyo heshiis share holder agreement, waa ka shareska sida loo wada yeelanaayo, marka qodabaa jira markuu heshiisku dhamaado waa in ethiopia lala galaa shardigaa ayaa ku xidhnaa, 5sano haa lakin waa markuu heshiisku dhamaado ee ethiopia heshiska lala galo, sidaas ayaa racsanayd. Heshiiska hore laba geesood buu ahaa maxan idhahdaayey 5sano labada dhinac ha ahaado, lakiin shardiga 5sano waxa daba joogay, markuu heshiisku dhamaado ee ethiopiana soo gasho ayuu ahaa markaa waa imka oo uu sedex geesoodku dhamaday, markaa haduu bilaab mayaa, oo ay xayiraadu bilaab maysaa.

2. Hadii aan ugudbo suasha labaad ee ahayd maxaa la qaybsanayaa, waa maxay waxa la qaybsanayaa, ama waa maxay waxa la wada yeelanayaa, waxa la qaybasanayaa waa shareska shirkada DP world Berbera, dakadase inaa iska leh DP world dekada malaha ee way maamushaa, markaa waa shirkada dakada maamusha saamigeeda iyo sidaa loo kala leeyahay, Mid walba waxa ay gashatay ayay ku lee dahay. Arinka ku saabsana xaga maamulka lacagta shilinka somaliland iyo dollarka, ee ah shilin bay ku qaadaa oo way badashaa waa run shiling bay ku qabataa, kharashka inta badana shilin bay ku qabata oo ay ku bixisaa shaqalaheeda shiling bay ku siisaa, dabcan waa shirkadoo shaqaalayblee dahay xagaa ka yimaada oo dollar qaata, dabcan inay dollar ku badalato sax weeyi, markii horena heshiiskeenu sidaa ayuu ahaa, haday macashkeedan dollar bay ku badalana kartaa, wixii kharashaada ee ay leedahay ee ay u bahan tahay in dollar ku bixisana dollar bay ku bixinaysaa,

**Md. Cabdiqaadir Xasan Askar:-**

1. Waxa la bixiyaya shares, sida hada aad sharaxayso ee ah oo DP WORLD ay leedahay 51%, ethiopiana ay lee dahay 19%, somalilandna ay lee dahay 30%, memorundom of

understandinkii horena, waxa ku jiray saami ahaa inmay soomaliland lee dahay 35%, DP WORLD NA LEEDAHY 65%,hada waxa soo baxay, in Somaliland laga jaray 5% oo ay ku soo hadhay30%, DP worldna laga jaray 14%oo ayku soo hadhay51%, waxa ahayd soomalilnd shareskeedaa, DP WORLD shsreskeeda iibin karaysay oo cid kale ka iibin karaysay, side bay ku dhacday in somaliland shareskeedii qayb ka mida iyadana iibs.? Qiime intee leeg ayayse iyadna ku iibisay oo ah 5%ka ay dawlada Somaliland iibisay shareka dekada Berbera?

2. Suashayda labaad waxa weeyi wax time line ma jiraa, oo hawlaha faraha badan ee wasiir aad heshiisyadooda hore u keentay qaarkood, qaar kodna kuu hadhsan yihiin ee ah DP world iyo hawsheeda, saldhigii military iyo hawshiisa, free zoneka iyo hawshiisa, wax time line ah oo aad haysaan hada oo aaad noo sheegi karto, oo ku saabsan sanadkan iyo sanadka danbe iyo ka ka sii danbeeyo wax alaqabanaayo mid walba?

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Xildhibaan aad baad u mahdsana tahay suasha hore, ee ah maxay ku dhacday in somalilnad share keeda iibiso, heshiisku waxa uu odhanayaa markii hore ee aan labada darif ahayn, labada geesoodba xaq bay u leeyihiin inay share kooda ka iibiyan haday cida kale reeli ka noqoto, markaa shardigaas baa nu ku iibinay saamigeena qayb ka mida oo ah 5%, iyadoo shardigaas raacaysa ayay DP world na 14% saamigeeda ay ku wareejisay ethiopia, markaa sharciga ayaa inoo saamaxaaya heshiiskaana inoo nsaamaxaaya. Miyuu jiraa wax time line ah mashaariicdeena oo dhan, shareku guud ahaan 18million oo share, sharkiina waa norminal value buu lee yahay oo waa $1, lakiin ethiopia waxa hare ka ay siisatay, ama aan dhafsanay in ayb lacag 80million ah, oo ah saamiga kaga soo hagaagaya 442million in ay maal gashato, waxa kale oo runtii aanu ethiopia u dooranay oo nu ka doonayna waxa weeyi waa macmiil, qofka macmiilka ah markaa dan wadaagtaan dabcan tixgalin dheeraada ayuu ku siinayaa, markaa waynu bahanahay iyo siku dheeli tirka markii hore aan sheegay gancsiga inaga iyo ethiopia inaga dhexeeya, gancsigeenu iskuma dheelki tirna wax badeecada oo aan inagu gaynaa ma jiro, waxa laga yaababa in wajaale wax ka gudbi jirtay lakiin imika wayba iska taagtay gabigeeduba, markaa horta dantaa baa inoo gaysay.
2. Arinka ku saabsan wa time linihi ma jiraan mashaariicdan, mushruuc walba waxa weeyi inuu time line yeesho, time line ku waxa weeyi in dekada balaadhin teeda, iyo dhismaha free zone ka labaduba ay bilaab maan sanadkan badhtankiisa bilaab maan, waxay socon doonaan ilaa muda 18biloda ilaa 24bilood, insha allaah.

**Md. Maxamud Jaamac Warfaa:-**

1. Waxan ku bilaabaya su'aashayda ah, heshiiskii aynu la galnay DP world wuxuu dhigayay inay dakadeena maal galin ku sameeyaan, waxa jirtay iyada oo maalgalintii wali inay iyagoo lacag 440milliona, ay ku hormarin doonan, 400mitirna ay ku dari doonan dakada, qalabna ay keeni doonaan, iyaga oo aan wali maalgalintii bilaabinba ina

y dakhligii soo galaya dakada ay qabataan, oo ay maamulaan raa macnaheedu miyayna ahayn dakhligii dakadeena ka soo baxayay uun bay dib inogu maal galinayaan.?

2. Su'aasha labad waxa weeyi badeecadaa ka soo dagi jiray dakada Berbera waa la yaqaanay, alaabta ka soo dagta dakada Berbera inta tanay tahay sanadkii inta containers ee yimada, mudo sanada ayay imika maamulayeen, maxay soo koedhiyeen heshiiskeena waxa ku jiray in ay soo kordhin doonaan badeecado iyo container sanad walba intaa tiradoodu tahay, taasi, may isdhintay mise korodhkiibaa halkii ka sii socda?

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Waa runtaa weeyi heshiisku waxa uu ahaa in dakada la baladhiyo, oo la qalalabeeyo, maamulkeeda la hagaajiyo, kii uun baana lagu socdaa imika qalaba ala keenay ilaa dhawr labatan qalaba weeyi waa la keenay, maamulkii wax badan baa laga qabtay , xaga baladhintana iyo dakada sida aan kuu sheegay waxa la bilabi doonaa sanadkan badhtankiisa, insha allaah 400mitir ee ugu soo horeeyay, laga yaaba madaama markii hore ay joogeen Djibouti lakinn imika ay iyagiyo djobouti ay isku xumaadeen, oo ay Djibouti ka tageen ina y halkiin 400mitir ahayd kaba badiyaanba, oo markaliya dhawr boqol oo kale lagu soo daro waa suurta gal, xaga lacagta lacagteenii ee ah lacagteenii uun bay qaateen oo taasi uun bay inoo maal galinayaan, lacagta dakada inaga soo gashaa haday ku filana tahay, inaynu maal gashano oo intaa oo mitiraynu ku darno 400 ila 800, dee horaan u samaysan lahayn, lacxagta ka soo baxdaa mid ku filan may ahayn, waxa nu u bahamahay in maalgshi xooga shirkadu samayso, dabcan wixii ka soo baxa wixii xaq ay u leeyihiin bay ka qaataan, inagana waxa aan xaq u leenahay Ayaan ka qaadanaynaa, sida mar hore aan sheegay march marka ay dhamaato xisaab xidh baa laga rabaa, markaa wixii ka soo baxay iyo sidii loo qaybsamay waan arkaynaa.

2. Qodobka ah miyay koradhay intii aan u dhiibnay xogta an anigu haya waxa weeyi, xagana waxa jooga mareeyihii dakada, xaga containerska aad iyo aad bay u koradhay, containeradu waxa ay marayaan ilaa 10,000 container weeyiu bishiiba, waxa ay kordheen 40%, hadii aad ka soo qaaado 10,000 sanadkii 120,000 container sanadkii waliba waa bilaw, waxan rabnaa inan gadhsiino Ilaa 1,000,000 oo cointainer sanadkii, insha alllah mashruuc waa bilaw.

**Md. C/raxman Cismaan Caalin:-**

1. Sacadatu Wasiir malaha waxaan isleeyahy waxa iskaga kaaya qaldan heshiiskii qodobada kujiray iyo xeerkii, anigu bal far waawayn aan ku qoro, markii aad halkan ka hadlaysay arinta DP world lagalayay, waxad afkaaga ka tidhi brief principles weeyi kani e heshiisku waa danbeeyaa imikana, principleskaa waxa ku qornaa 65% DP world ah, iyo 35% Somaliland ah, imikana share kalaa keentay yaa awood inii siiyay inaad wax ka badashaan? Ilay barlaman ayaa ansixiyee hadii aad barlamanka dib ugu soo celin, yaa

awood inii siiyay inad wax ka badashaan share kaa uu baarlamanku ansixiyay ee base kiisu ahaa 65%,35%? Sidaa ayuu heshiisku ku buray.

2. Ta labaad maalgashiga waxa aad sheegtay in shareska la qaybsaday, in dadka bahasha samaystay ee baashe iyo samsam iyo qaar kale ku jira inay 5million leeyihiin, adigu wax share ma ku lee dahay? Intaa oo heshiis ayaa sheegtay inaad shirkado lagashay, waxana tahay wasiirka arimaha dibada, marka waxa aad ahayd wasiirka qorshaynta, xabad kaliya maad keenin, kan ma keenaysaa imika? Heshiis yadaa oo dhan ma keenaysaa.

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Xildhibaanku waa ku mahad san yahay suaalihiisa, xildhibaanku waxa uu yidhi markii aad halkan nooguy keenteen, heshiiskii ama principleskii ama time sheetkii adigu magaca doontaba u samee, labo cid uun baa shirkada wada lahayd Somaliland iyo DP world,65% iyo 35% yaa awoda inii siiyay inaad badshaan. Horta xildhibaan waxa ay ku qornayd heshiiska in ay cid walba xaq u leedahay in saamigeeda cid kale ka iibiso, haday cida kale la ogashay, markaa xaqa waxa na siiyay heshiiska na siiyay, aad ansixiseen inigu, hadii heshiiskoo dhan halkan lagu soo celinayo taa horaan uga hadlay hadii uu yahay arin distooriya distoorka ka hor iman mayo, wixii distoorka yidhaahdo uun baan nu yeelaynaa inagu.

2. Qodobka ku saabsan shirkadan Somaliland investment company, iyo cida saamiyada ku leh iyo waxa la gashaday, sidaan aan hore u sharaxay shirkada waxa iska leh Somaliland, shareka la ogol yhay waxa weeyi, kuwa hada la maal galiyay maaha, waxa ay noqon karaan 5million waa infiil lakiin share jira maaha wali. Oo ay cidi lacag gashatay maaha, cidina ma yeelan karto sam sam na ma yeelan karto, aniguna ma yeelan karo, sharena kuma lihi waxna ma gashan, mana gashan karo sharcigu sidaa ayuu dhigayaa dawlada ayaa iska leh, hadii aay dawladeenu 5million bixinayso iyo hadii wax kale bixinayso, taas dawladaa iska leh, waxaana inooga masuula wasarada maaliyada, anigu runtii masuul kama ihi.
3. Arinka ku saabsan heshiisyada aynu galnay iyo keenistooda halkan, anigu waxan aaminsanahay nidaamka dawliga ah ee distoorka, sharciga inoo yaala, sharcigu waxa uu ina farayo waanu ku qasbanahay inaynu yeelno hadii aan wasiir nahay iyo hadii aan xildhibaano ama madaxwayne nahay.

**Md. Ibraahim Caraale Cabdi:-**

**1.** Saacadatu Wasiir, waxaynu ognahay somaliya inay diidan tahay jiritaan keena iyo gooni siku taageena jamhuuriyada Somaliland, waxaynu kale ognahay iyagoo ina diidan ciidankeenuna uu xadka ku sugan yahay, una diyaar yahay inuu dhiigiisa u daadiyo ilaalinta jamhuuriyada Somaliland, waxaynu ognahay inay aad iyo aad uga qaylyeen heshiiskan ayay nu ognahay,inay ashkateeyeen dacwad ka dhan ah ay u gudbiyeen

jaamcada carabta, miyayna taasi muuujinayn in heshiiskani u lee yahay faaido wayn qarankan jamhuuriyada Somaliland, una horseedi karo ictiraaf? Isla markaa miyad arinkaa iibin karri waydeen dawlad ahaan way iska cadahay oo cadceeday ka cadahay heshiiskani dalkan inuu faa'iido u leeyahay. Waxa tihiin golihii shacab kani soo doortay ragna xabad buu xagaa la taagan yahay inina eraybaad ku taagi laa dihiin, Somaliland waxay u baahna tahay waa dal yar oo curdina, asalba waxa uu bili aadanku faa,idea ama kahasaaraa marka uun dhaqdhaqo, hadaanu dhaq dhaqaaqinba, oo markuu halkaa uu dhaqaaqaba yidhahdo waa jabaysaa ama meel baad ka dhacaysaa mana faa,ido mana khasaaro, dawlada ayuu xilka saran yahay oo loo doortay in qarankan horumariso, waxay u baahan tahay Somaliland shirkado maal gashi oo badan si ay u gaadho hormar, ma haysaan sacadatu wasiir shirkade maalgashi oo kale ma haysaan, mise waxa ku dhaga barjawdeen hadalka mucaaradka, ee odhanaayo koob hadii la dhigana waa in la qaaday ahayd, hadii la qaadana in la dhgay ahayd?

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Xildhibaanku suaala waa I waydiiyay erayo faala ahna waa yidhi, meel fiicana wax waa dhigay waa nin muwaadina, xildhibaan wixii uu cadawgeenu kanaxo waa wax faa,ido inoo leh, waan qabaana runtii xitaa hadalkan saaxada yimid ee caalamiga ah inuu korba ub qaadaayo qadiyada iyo magaceena, marka qaar keed wuxuu inoo samaynayaa xayaysiis bilasha ba runtii, inay doodu meel walba soo gaadho oo meel walba lagaga sheekeeyo, oo jornal walba lagu qoro, markan waxan arajaynaynaa inuu keeno ictiraafkeena. Arinka ku sabsan shirkadaha kale, shirkado dhawra ayaa inala jooga imikaba oo ajnabiya oo doonaayo inay wadankeena maalgashadaan, maantadan qado Ayaan la leehay shirkad wayn oo danaynayso inay wadanka maalgashato, way nugu badan yihiin oo way noo yimaadaan, waxay nu aabahanahy inaynu abuurno jawigii shirkadaha soo jiidanayay, inaynu u samayno weelkii ay wadanka ku iman la haayeen, inaynu soo dhawayno bay run u baahanahay, waayo wadankan waxa uu u baahan yahay maal gashi. Dadkeenunua waa bilaa camal inaynu camal u abuurno, sidaan camal ugu abuuri karnaa waxa weeyi inaynu shirkado maalgashi, markaa insha allaah wan ka shaqaytnaynaa sifiicana way u socotaa imika.

**Md. Maxamed Yuusuf Waabeyo:-**

**1.** Mudane Wasiir shirkada DP World, waxa ay mandaqadan ka gashay heshiisyo badan, qaar kood wadamada jaarka ah waxa ay isla galeen maxkamad sida wadanka Djibouti oo kale, hadii aynu is qabano waa xagee maxkamada inoo garnaqayso? Xagay ku taala? Maxayse position keenu noqonayaa? Suashayda labaad waxa la sheegay inaan 35% kii 5% iibinay, 14% ay DP world iibisay, 5% ay iibisay dawlada Somaliland lacagteedii mee day, goormaa nu arkaynaa, waxa moodaa dunidii cold warkii soo cusboonaaday oo u ekaatay sidii dagaalkii qaboobaa oo kale, maxa wasarada arimaha Dibaba somalilnad uga meel yaala? Marxaladahan imika dunida ku soo kordhay ee ay is eryanayaan wadamada

chine ama reer galbeedka, ama ahaaato wadama carabta, siay uga faidaysano wasaarada arimaha dibada inooga meel yaala siyaasadaa?

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Waad mahad san tahay xildhibaan waa suaalo wanaagsan, had iyo jeer heshiisyo walba qodabaa jira, qodabaa waxa ka mida, hadii la heshiin waayo ama wax la isku qabto xagee la tagayaa, inagana heshiiskeena waa ku qoran yahay, waxa nu isla tagynaa maxkamada kala saarta dadka heshiisyada wada gala khaasatan xaga ganacsiga, oo ku taala xaga ingiriiska, markaa sharciga ingiriiska aya ina kala saaraaya. Djibouti iyo Dubai laftoodu sidaa oo kale ayay ahayd, waxa ay isk ashkateeyeen maxkamada sharciga ee ingiriiska. Arinka ku saabsan saamigeena ee 5% ah mee lacagtii xagay qabanaysaa, sidii maalintii hore aanidinku sharaxay, 35% keena aynu lee nahay saamigeena 10% waa inagu dayn, 10% kii inagu dayntii ahaa ayay 5% iyay inaga goynaysaa, markaa lacagtii daynta inagu ahyd uun bay bixinaysaa. arinka ku saabsan dagaalka qabaw, eek u soo biiray saaxada calamka oo aad moodo in dib loogu noqday 70,60kii, horta inagu waxa jecelnahay oo rajaynaynaa inuu gobalkeenu ahaado mid inoo nabdoon, inaga nabad bay dantu inoogu jirtaa inaga iyo jaar keenaba, hasa yeeshee mararka qaarkood waxa qasaba inaad mawqif aad qaadato ayaa kugu qasaba, inagu bari dhawayto mawqif baan qaadanay inaynu tageerno xulufada sucuudiga, marka inagu xulufadaa baan ku jirnay, lakiin inagu kuwa aan la jirnio iyo kuwa aynu la jirinba waxa aynu rajaynaynaa wadamada madqada ku nooliba ma ajasiiratul carab ha ahaadaan, ama geeska Africa ha ahaadaan inaynu nabad kuwada noolaano, wixii ka dhaxeeyana ay nabad ku dhamaystan Ayaan jecelnahay .

**Md. Faarax Maxamuud Cabdule:-**

**1.** Mudane Wasiir adigoo fadhiya miiskaa aad hada fadhido, markii aad heshiiskan nuxurkiisa noo keentay waxaad noo sheegtay in heshiiskani yahay labo qaybood oo ah DP world iyo somalilnad,mudo 5sano ahna aan waxba laga badalayn, sharka aan waxba laga badalayn 5sano ee hore, hadalku wuu duuban yahay waa cad yahay, hadii wax laga badalaayo 5sano ka bacdi, in ay qolada kale xaq u lee dahay in ay iyadu iibsato, haday ku diido oo ay tidhaahdo uma baahnin, markaasaa laga iibinyaa cidii ay dawlada somalilnad ay ogalaato, anagu taasi baa nu ansixinay qoraala leh duubana heshiiskana waa sedex geesood way kal duwan yihin, markaa si aan anaguna u fahno, miyayna sharci ahayn inaad golaha horkeentaan oo wax ka badal kaa madaama sedex geesood noqday, markii hore labo geesood ahaa share kiina is badalay, mudo 5sano ah na ay ku qornayd in waxba laga badalin miyayn ahayn si, aanad u arag adigu, madaama aad tii horena hogaaminayso aad yii horana hogaaminaysay, inaad wax ka badal kaa ad golaha horkeento?

**2.** Ta labaad waxa weeyi shirkadan aad tidhi somalilnad baa leh, shirkad kasta ama hay'ad kasta oo ay dawladu lee dahay sharci bay ku dhisan tahay, madaama hadal keediina

badatay adiguna aad ku adkaysanayso inay dawladu lee dahay, mar hadii ay dawladu lee dahay sharcigeedii ma noo keenaysaa oo golayaasha ma keenaysaa?

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Xildhibaan waad mahad santahay, hadaan su'aasha ugu horeysa aan ku bilaabo, lock in period 5 sano, xildhibaan sidaan markii hore sharaxay heshiiskaa waxa ku qornaa marka ay ethiopia ay soo gasho ayuu bilaab mayaa lock in periodku, lock in periodku haduu inoo bilaab mayaa, lakiin markii hore shardi baa ku xidhnaa shardigii wuu buuxsamay, markaa haduu inoo bilaab mayaa, golay markaan halkan la iniiga akhriyay la iniigama wada akhrin qodob qodobe, documentka waa ku qoran yahay. Miyay na ahayn hadii wax laga badalay in golaha la keeno, wixii golaha la keenaayo sharcigaa loo raacaya markaa taa horaan uga hafeeftay, wuxuu sharcigu odhanaayo uun bay nu raacaynaa, lakiin soo galida ethiopia ay soo gashay waxa uu ku salaysan yahay qoraalkii hore, oo maaha wax cusub.

**Md. C/laahi Axmed Madar:-**

**1.** Anigu waxan qabaa eraygaan aan isticmaalayno ee heshiis inuu yahay miss order waayo wixii halkan aan ku fasaxnay wuxuu ahaa, warqad memo ah in loo ogalaado in wada hadal lagula galo DP worldka on the base of that document, waxana lagu balan Sanaa marka uu sharci noqdo ama heshiis noqdo in golaha lagu soo celiyo si uu sharci u noqdo oo time kaa ay bilaabaan kana imika waxan leehay sharci maaha. Marka waxan leehay halkaa ka bilaaba oo ku bakin gareeya, mise wax maa la yeedhinaayay mise gorgortankii baa halkaa ku gaadhnay?

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Xildhibaan su'aal fican baad I waydiisay waa sax weeyi, maalintii hore waxa aan idiin keenay waa time sheet bay ahaayeen oo ku dhigan yahay nuxurka iyo tiirarka muhiimka ah ee heshiiska kaas baad ansixiseen kaas bana ku gorgortanay, sidii aan markii hore idhi hadii uu sharcigu odhanaayo mar kale golaha ha la horkeeno anigu sharciga ka hor iman mayo, wixii distoorku yidhaahdo uun bay nu yeelaynaa taasi wa arin sharci weeyi.

**Md. Cabdikariim Aw Cali Shabeel:-**

1. Mudane Wasiir Soomaalidu waxay tidhaahdaa alif kaa xumadaa al baqruu ku dhibaa, waxa weeyi sida ay xildhibaanadii intooda badani ay ku dhawaaqeenaniguna aan la qabo, waxa jirta heshiiskan iyo arinta DP world iyo Somaliland dhexmartay mad madaw baa ku jira, mad madawgu sida uu ugu jiraana waxa weeyi markaa aan illaahay hortii u hadalno intii gooree halkaa aad noogu timid, mar walba waxa aad ka dhawaa jinayseen in marka arinkaa soo dhamaado heshiis rasmi aha golaha la horkeeni doono,waxa aanu qabnaa anagu in aanu heshiis ahayn waxaan ansixinay, ee uu ahaa nuqul markaa waxa weeyi waxba ma diidanin wixii Somaliland horu mar u keenaayo, hadaa tan ethiopia

anigu wax aan qabaa inay danwayni iyo masraxad inoogu jirto, suaashan waydiinaya waxa weeyi wasiirka si ay arinkani u toosto oo ay sax u noqoto dadkuna ay jahawareerka uga baxaan iyo goluhuba, oo waxa ay golaha iyo xukuumada ay isku raacsan yihiin oo meel mar ah loo helo,heshiiskii rasmiga ahaa in golaha lakeeno weeyaan suasha igu horayso?

2. Hadii ay hay'ad dawladeed tahay arinkani oo tidhi Wasaarada Maaliyada ayay hoos imanaysaa dee xeerkeedi waa in la keenaa, waayo mugdibaa ku jira shiraakada yaa sameeyay, xagay ka soo dhacday, siday ku timid, cida lihi waa ayo, waxa weeyaan suaalo badan baa la iska waydiinaya aarinkaa, markaa waxa weeyi wixii in mugdi la galiyo maaha haday haayd dawladeed tahay waxa weeyi hala keeno xeerkeedii?

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Xildhiban aad baad u mahad sana tahay, qodobka horee ah time sheet baan ku ansixinay dee dhawr jeer baan ka hadlay, waxa lee hay wixii sharcigu odhanaayo uun bay nu yeelaynaa, aniga afkayga maaha waa la keeni iyo la keeni mayo, wixii sharcigu yidhaado uun baa la yeelayaa. Waxa ku jira mad madaw heshiisyadan anigu inuu mad madaw ku jiro ma qabo oo way ii cadahay waana nu badnayn, wakhti badana runtii waa naga galay waa arin cad inuu mad madaw ku jiro uma arko.
2. Arinka ku sabsan shirkada in xeerkeeda halkan la keeno anigu waxaba kama qabo, shirkadu waxa ay lee dahay ariticle resolution and memrudam, halkan hadii la keenaayo oo sharcigu odhanaayo waa la keenaayaa wax dhibaata ah malaha, wuxuu sharcigu odhanaayo in baa inaga lafteenu na racayna.

**Md. Maxamed Jaamac Cabdi:-**

1. Waxaan doonayaa wasiirka inaan waydiiyo sedex suaalood oo koob kooban oo ayan jeclahay inaan ku waydiiyo wasiir, si qof loo maal gashado am acid loola share gareeyo, waxa waajiba cidaa maal gshaynaysaa waxa ay eegtaa profileka cidaa ay wax la wadaagayso ama la share garaynayso, wax aad ogtahay heshiiskan markii lagalay iyo sida nidaamkii xukuumadii aad ka tirsanayd ee hore ay ahayd, mad madw badan baa jiray side bay nu uga dhigi karnaa mid daah furan shirkada, waxa soo marayso maal galin faro badan oo dalkoo dhana, waxad sheegtay sedex geesood inuu noqday heshiiskii dakadu, side bay suura gal u tahay inuu noqdo mid daah furan, oo golayasha iyo auditka dalku hab xisaabeed oo furan side baa loo heli karaa?

2. Qodobka labaad shirkad baad sheegtay, shirkadaa waxa ad ku sheegtay inay tahay mid ay dawladu leedahay puplic intity weeyi hadii ay tahay shirkad qabanaysa hawl caama oo ay leeyahay qaranka oo dhan, waxa weeyi qaranka dadka laga wakiilka yahay waa shacabka share holderkuna waa shacabka, madaama ay shacabka yihiin, shirkad guudna ay tahay qodabka 112 ee dastuurku siduu tilmaamayo inay tahay hayda madax banana,

hayad madax banan oo aan golayaashu ansixin, side baad ugu shaqayn kartaaoo ay tahay weel oo ayna agolayaashu ansixin, oo aad u aaminteen side baa la inigu aaminayaa, oo ku meel meriseen, mar hadaana xeer keedi iyo hawsheediiba inoo dhisnayn aan wali la ansixin?

**Jawaabta Wasiirka:-**

1. Side loo helaa hab xisaabeed furan oo ay cid waliba ku qanacdo, horta halkan waxa iiga soo baxday malaha in loo bahan yahay in la badiyo wada socodka iyo wada xidhiidhka, hadii ay jiraan qodobo baarlamaan ahaan iyo xildhibaano ahaanba in haday jiraan qodobo u baahan in la waadixiyo oo uu mad madw ku jiro, inaynu ka sheekaysano markaa.

2. Arinka ku saab san lahaansha ha shirkada, iyo inay tahay shirkad madax banan sharciguna odhanaayo wixii haayada ee madax baan halkan waa inla keeno, anigu arinkaa sharciga uun baa ka xigaa haduu sharcigu odhanaayo hala keeno golaha waa la keenaayaa, imika waa shirkad aan ka samaysanay dubai financial international center, hadii shuruucdeedana way lee dahay contitionkeeda na way lee dahay, prime keedana way lee dahay, wax kaste oo shirkad looga baahan yahayba way lee dahay, hala keeno waxaasoo dhan halkan ha lagu munaaqisheeyo ama halala qayb sado xildhibaanada sharcigu haduu sidaa odhanayo waxba kam qabo.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
**-----------------------------------------------**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
**----------------------------------------**